


Xuquuq. Ixtiraam. Aaminaad.

Xukuumada Fiktooriya Istaraatiijiyadeeda Ka-hortagga Dhibaataaynta Dadka Waayeelka ah



Xafidaada xuquuqdaada

Dadka waaweyni waxay leeyihiin xuquuq, sida ay sameeyaan dad da' walba leh, si ay amaan ugu noolaadaan guryahooda, uga nabadgalaan rabshada, waxyeellaynta iyo dayacaada iyo dhiigmiiradka lagulana dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh.

Xaalladaha badankood, kuwani waa waxa badanaa dhaca. Si kasta ha ahaatee dadka qaarkood xaalladu sidaas maaha maadaama lagu sameeyo waxyeellayn iyo dhiigmiirad.

Waxay noqon kartaa wax adag in laga hadlo dhibaataadaan khaasatan markay khusayso qof kugu dhow. Sidaas darteed waa muhiim in la hello caawimo iyo talo.

Si aan kuu caawino, Xukuumada Fiktooriya waxay asaastay adeeg gobolka oo dhan ah, kaas oo ah qarsoodi iyo lacag la'aan, ayna bixiso Seniors Rights Victoria:

- macluumaadka khadka caawimada iyo xawilaada
- u hadlida iyo kaalmada
- adeega sharciga
- waxbarashada mihnadeed iyo bulshada.

Qof walbaa waa wici karaa Seniors Rights Victoria.

Nambarka lacag la'aanta ah oo Seniors Rights Victoria waa **1300 368 821** wuxuuna furan yahay 10ka subaxii ilaa 5ta galabtii Isniinta ilaa Jimcaha. Online www.seniorsrights.org.au

Haddii adiga, ama qof aad taqaan, uu ku jiro khatar muuqata oo degdeg ah lana xiriir Booliiska Fiktooriya 000.

Ageing & Aged Care Branch

Department of Health

12th Floor

50 Lonsdale Street

MELBOURNE 3000

Australia

Tel: (61 3) 9096 7389

Fakis: (61 3) 9096 7943

Email: aged.care@health.vic.gov.au

www.seniorsonline.vic.gov.au

Macluumaadka ku jira xaashidaan xaqiiqada waa macluumaad guud keliya. Maaha inaad ku tashato inay tahay talo sharci taas oo khusaysa xaalladaada gaarka ah. Haddii aad qabto wax su'aalla ama u baahan tahay talo, la xiriir hay'adaha ku qoran xaashida xaqiiqada